

# Coarctation repair: Resection with Extended End to End Anastomosis

Hagaajinta ciriirka halbowlaha weyn: Goynta qeybaha dhuuban iyo farsameyn ah iskutolid




© 2012 The Children's Heart Clinic




Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404


© 2012 The Children's Heart Clinic

**Qalliinka Hagaajinta Ciriirka Halbowlaha Weyn**
**(eeg Ciriirka halbowlaha weyn)**
Surgical Repair of Coarctation of the Aorta
(see Coarctation of the aorta)

**Goynta labada dhammaad ee la isku tolayo:** Jeexitaan dhinac ah qaarka sare ayaa lagu sameynayaa dhanka dambe ee xabadka bidix ee ilmaha. Patent ductus arteriosus (xidid dheeraad ah ama PDA), haddii uu jiro, waa la xirayaa (oo la isku tolayaa). Maqasyo caag ah ayaa lagu qabanayaa halbowlaha qeybta ciriirka ku jirtah, si uu dhiiggu ugu sii qulqulo qeybta sare ee jirka iyo madaxa. Qeybta ciriirka ee halbowlaha waa la jarayaa oo labadeeda daraf ayaa la isku tolayaa.

**Goynta laba daraf ee la isku tolayo:** Hawshan waxaa la qabtaa markay jirto ciriir ku dhaca halbowlaha markuu unugweynaad jiro (dhuubasho ah halbowlaha qeybtiisa gudubka ah). Taas waxay keeneysaa goynta labada daraf ee dhinacyada dhuubtay iyo in la isku tolo. Hase yeeshee, ka dib marka qeybta ciriirka ah la saaro, jeexitaan ayaa lagu sameynayaa qeybta ka hooseysa ee ah buundada gudubka ah. Halbowlaha qeybta hoos u soo dageysa, oo cirifkeeda furan oo lala simayo meeshii la jeexay ee halbowlaha, ayaa markaa lagu tolayaa dhinaca hoose ee halbowlaha qeybta gudubka ah.

**Hagaajinta halbowlaha weyn:** Isla jeexitaanka kor lagu sharxay ayaa la isticmaalaa iyo xididka PDA, haddii ay jirto, waa la xirayaa. Maqasyo caag ah ayaa lagu qabanayaa halbowlaha qeybta ciriirka ku jirtah, si uu dhiiggu ugu sii qulqulo qeybta sare ee jirka iyo madaxa. Jeexitaan ayaa loo sameynayaa hab dherer ah iyadoo loo marayo qeybta ciriirka ah iyo sharooto, oo inta badan laga sameeyo Gore-tex® (Gore), oo ka dib ayaa lagu tolayaa meeshii la jeexay si loo kordhiyo dhexroorka halbowlaha ciriirka ah.

**Dibu-celinta daboolka kalxanta hoosteeda (badanaa waxaa la socota goyn iyo dheereynta ilaa dhamaadka la isku tolayo):** Habka qalliinkan waxaa loo isticmaalaa dhuubashada halbowleyaasha waaweyn ee wadnaha ee bidix iyo halbowleyaasha bidix ee kalxanta hoosteeda (unugweynaadka buundada fog). Isla jeexitaanka kor lagu sharxay ayaa la isticmaalaa iyo xididka PDA, haddii ay jirto, waa la xirayaa. Halbowlaha bidix ee kalxanta hoosteeda waxaa lagu xirayaa cirifka sare ee saabka xabadka. Maqasyo caag ah ayaa lagu qabanayaa halbowlaha qeybta ciriirka ku jirtah, si uu dhiiggu ugu sii qulqulo qeybta sare ee jirka iyo madaxa. Goynta iyo fidinta labada daraf ee la isku tolay ayaa badanaa la sameynayaa marka hore. Ka dib marka la dhammeeyo, halbowlaha kalxanta hoosteeda ayaa la goynayaa oo gees ayaa laga jeexayaa ilaa heerka halbowlaha, ka dibna ilaa halbowlaha kale ee weyn ee bidixe. Halbawlaha kalxanta hoosteeda ayaa markaa hoos loo laabayaa jeexidda dusheeda oo waxaa lagu tolayaa dhinaca sare ee buundada halbowlaha, taas oo kordhineysa cabbirka fogaanta buundada halbowlaha.

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka**:** Qalliinku badanaa wuxuu qaataa 2 ilaa 3 saac.
- Qalabka Tuubooyinka: Badanaa ilmaha waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, faleebbe (si looga siiyo daawo oo dhiig looga qaado) tuubbada kaadida lagu qaado ee Foley, leyn ah halbowlaha oo lagula soconayo dhiigkarka, iyo tuubada xabadka ee dheecaanka qaadda.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada guud ahaan waa laga saarayaa muddo yar qalliinka ka dib ama subaxa ku xiga. Tuubada xabadka waxaa looga saarayaa 24 ilaa 48 saac, marka dheecaanku yaraado. Badanaa ilmaha cadaadiska dhiiggooda ayaa kordhaya ka dib hagaajinta ciriirka halbowlaha oo waxaa loo baahan doona daawo si loo xakameeyo. Leynka halbowlaha waxaa la saaraa marka laga saaro daawooyinka faleebbaha si loo xakameeyo dhiigkarka cadaadiskiisa. Tuubada xabadka waxaa laga bixinayaa marka loogu baahneyn daawo iyo sheybaar awgood.
- Muddada seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 7 ilaa 10 maalmood. Badanaa wakhtiga joogitaanka waa muddo dheer haddii ay ilmuhu u baahan yihiin qalliin sida dhallaanka markaas dhasha; oo waxay u baahan doonaan wakhti ay ku bartaan in ay wax cunaan ka dib qalliinka.


© 2012 The Children's Heart Clinic

**Qalliinka Hagaajinta Ciriirka Halbowlaha Weyn**
**(eeg Ciriirka halbowlaha weyn)**
Surgical Repair of Coarctation of the Aorta
(see Coarctation of the aorta)

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib hagaajinta halbowlaha ciriirku hayo sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawooyinka lagu xakameeyo dhiigkarka (Enalapril, Captopril) dhowr toddobaad ilaa bilo qalliinka ka dib


© 2012 The Children's Heart Clinic